



# Hababka soo socda ayay Dugsiyada Dadweynaha Portland u wargeliyaan qoysaska marka ay cimiladu xumaato

Iyada oo aan ka warqabno in xilligii jiilaalku uu aad inagu soo dhow yahay, sidoo kalena xusuustii sanadkii aan soo dhaafnay ee baaxada barafku lahaa wali ay inagu cusub yihiin; waa waqti wanaagsan in aad dib u eegno sida Dugsiyada Dadweynaha Portland ay u wargalinayaan qoysaska marka ay cimiladu inagu khasabto in iskuuladu dib u dhacaan ama la xiro.

Waxaa jira saddex dariiqo oo aan fariimaha ugu dirno qoysaska kuna saabsan dib u dhaca iskuulka ku yimi, xiritaanka iyo go'aamada kale ee la xiriira cimilada:

- **Wicitaanka telefoonka:** Fariimo isdiraya ayaa loo dirayaa telefoonada ku diiwaangashan arday kasta waalidkiisa. Haddii aad bedeshay telefoonkaasi dhawaan, fadlan waxa aad dib uga cusbooneysiisaa iskuulka ilmahaagu dhigto.
- **Email:** Fariin email isdireysa ayaa loogu soo dirayaa cinwaanka email ee ku diiwaangashan ilmahaaga markii iskuulka laga diiwaangaliyey.
- **Fariinta degdega(Text message):** Waxa aad heli doontaan fariin degdega oo ku timaada telefoonkaaga gacanta, laakiin marka hore waa in aad doorato habka SchoolMessenger adiga oo ku soo diraya "Yes" ama "Y" lambarkani 68453 (waxaad fiirisataa fiidiyaha ku lifaaqan). Ogow: Haddii aad doorato fariintaasi degdega ah wali waxaad heli doontaan fariinta codka ee isdirta, markaa waan ka xunahay haddii aad tahay dadk aan jecleyn fariintaasi codka ee isdirta ee aan waalidiinta u dirno.

Waxa kale oo jira saddex meelood oo kale oo aan ku wixii war ah ee cusub ku soo qorno:

- **Twitter:** Kala soco rugtayada, [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect).
- **Facebook:** Nagala soco halkani [Facebook.com/pps.connect](https://www.facebook.com/pps.connect)
- **Shabakadayada:** Waxaad tegtaa halkan [pps.net](https://www.pps.net) ka dibna waxaad raadisaa calaamada jaalaha ah ee bogga korkiisa ku taala. "Halkaasi waa meesha aad ka heleyso macluumaad fara badan oo dheeraad ah, sida jidadka waqtiga barafku jiro ay basaska iskuulku marayaan.

-Mike Tokito